النفاق والخيانة وخطرهما على الأفراد والدول
Munaafuqnimada iyo khiyaanada iyo halista ay u keenayaan dadka iyo dowladaha

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(الْمُنَافِقُونَ وَالْمُنَافِقَاتُ بَعْضُهُمْ مِنْ بَعْضٍ يَأْمُرُونَ بِالْمُنْكَرِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ الْمَعْرُوفِ وَيَقْبِضُونَ أَيْدِيَهُمْ نَسُوا اللَّهَ فَنَسِيَهُمْ إِنَّ الْمُنَافِقِينَ هُمُ الْفَاسِقُونَ)

(**Munaafiqiintu rag iyo haweenba qaarkood qaarka kale ayuu ka mid yahay waxayna faraan xumaanta, waxayna reebaan wanaagga, waxayna laabaan gacmahooda (wax ma bixiyaan) waxayna halmaameen Alle isna wuu ka tagay, munaafiqiinta iyagaa faasiqiin ah**), waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa oo xadiiskiisa sharafta leh ku yiri:

(آيَةُ الْمُنَافِقِ ثَلاَثٌ: إِذَا حَدَّثَ كَذَبَ، وَإِذَا وَعَدَ أَخْلَفَ، وَإِذَا اؤْتُمِنَ خَانَ)

(**Calaamadda munaafuqa waa seddex: hadduu sheekeynayo been buu sheegaa, hadduu ballanqaad sameeyana wuu ka baxaa, haddii amaano loo dhiibtana wuu khiyaanaa**).

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Waxaan shaki ku jirin munaafuqnimada inay tahay jirro daran iyo cudur dilaa ah, kali kali iyo koox koox wax u burburisa, munaafuqnimada waxay ka mid tahay jirrooyinka qalbiga kuwa ugu halista badan, kuwaasoo iimaanka saxa ah burburiya, asaaskiisana dumiya, waa aafo bulshadeed oo halis ah, oo amaanka bulshada khatar ku ah iyo nabadgalyadeeda iyo xasilloonideeda; sidaas awgeed halista munaafuqnimada waxay ka daran tahay gaalnimada iyo shirkiga, waa cudur marka uu jirka ummadda soo galo lafaha ka cuna kalatagna ku rida.

sidoo kale hubka khiyaanada iyo dabadhilifnimada waa waxa ugu daran oo khatar ku ah jiritaanka dowladaha taariikh ahaan, dowladaha burburay oo kala jajabay ama xataa suulay waxaa laga soo galay gudaha, kuwa khiyaanooleyaasha iyo kuwa cadowga u shaqeynayay ayaa kaalin weyn ka qaatay marka

taariikda dib loogu laabto, mar kaste halista gudaha kaga timaado dowladaha ayaa ka daran midda dibadda kaga timaado.

Waxaa habboon inaan ogaano munaafuqnimada waa labo nooc:

mid weyn iyo mid yar: **nooca koowaad**: waa midda ugu weyn labada nooc, waa nifaaqa ugu halista badan oo ah munaafuqnimada caqiidada gasho, qofka wuxuu muujinayaa islaamnimo wuxuuna qarsanayaa gaalnimo, Noocan qofka qaato wuxuu ku waarayaa naarta, balse waxaa la galiyaa meesha ugu hooseysa.

Nooca labaad: waa mid yar: waa munaafuqnimada camaliga ah, waa qofka dhaqankiisa wax ka qaldan yihiin, markuu qaato calaamadaha munaafiqiinta calaamo ka mid ah, waxaa oo kale weeye qofka inuu muujiyo ficnaan laakin uu qarsado wax arrintaas khilaafsan, noocan qofka ku dhaqmo diinta kama baxayo, laakin wuxuu hayaa jidka uu ku tagi lahaa munaafuqnimada nooca weyn hadduuna ka towbad keenin, Quraanka kariimka iyo sunnada nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - daahirka ah waxay nooga warameen munaafiqiinta iyo sifooyinkooda iyo dabeecadahooda iyo khiyaanooyinkooda, mana arkin iyadoo isbadashay waqti kaste ama wadan kaste, calaamadaha ugu muhimsan lagu garto munaafiqiinta waa kuwa soo socda:

* beenta iyo ballanburinta iyo khiyaanada amaanada iyo xadgudubka marka la doodayo:

Waa sifooyinka munaafiqiinta kuwa ugu xun oo uu nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - ku tilmaamay, waa munaafuqnimada camaliga ah oo uu caddeeyay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - markuu yiri:

(أَرْبَعٌ مَنْ كُنَّ فِيهِ كَانَ مُنَافِقًا خَالِصًا ، وَمَنْ كَانَتْ فِيهِ خَصْلَةٌ مِنْهُنَّ كَانَتْ فِيهِ خَصْلَةٌ مِنْ النِّفَاقِ حَتَّى يَدَعَهَا : إِذَا اؤْتُمِنَ خَانَ ، وَإِذَا حَدَّثَ كَذَبَ ، وَإِذَا عَاهَدَ غَدَرَ ، وَإِذَا خَاصَمَ فَجَرَ)

(Afar qofka ay ku sugan yihiin wuxuu noqonayaa munaafuq baraxtiran, qofkii caalaamo ka mid ah ay ku sugan tahay wuxuu wataa calaamad munaafuqnimo ah ilaa uu ka haro: haddii amaano loo dhiibto wuu khiyaanaa, hadduu sheekeynayo been buu shaagaa, hadduu ballan galana wuu buriyaa, hadduu doodana wuu xadgudbaa).

Qofka sifooyinkan ay isugu yimaadaan ama hal sifo qaato wuxuu noqonayaa munaafuq, sifooyinkan waxay ku cayaarayaan masalaxadda umadda, waxay keenayaan burburkeeda inta badan waxaan arkaynaa munaafuqa oo been sheegaya siduu dadka isaga dhigo inuu dhab ka yahay hadalkiisa iyo falkiisa, Alle wuxuu yiri:

٥

(وَمِنَ النَّاسِ مَنْ يُعْجِبُكَ قَوْلُهُ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَيُشْهِدُ اللَّـهَ عَلَـى مَـا فِي قَلْبِهِ وَهُوَ أَلَدُّ الْخِصَامِ)

(**Dadka waxaa ka mid ah mid ku yaab galin hadalkiisu noloshan adduun, maragna gashay Alle waxa qalbigiisa ku sugan, isagoo dood badan**), marka lagu sheego Quraanka kariimka munaafuqnimada iyo dhagarta iyo khiyaanada amaanada waxaa lala sheegaa beenta, Alle wuxuu yiri:

(يُخَادِعُونَ اللَّهَ وَالَّذِينَ آَمَنُوا وَمَا يَخْدَعُونَ إِلَّا أَنْفُسَهُمْ وَمَا يَشْعُرُونَ * فِـي قُلُـوبِهِمْ مَـرَضٌ فَـزَادَهُمُ اللَّـهُ مَرَضًـا وَلَهُـمْ عَـذَابٌ أَلِـيمٌ بِمَـا كَـانُوا يَكْذِبُونَ)

(**Waxay khiyaameyn Alle iyo kuwa (Xaqa) rumeeyay mana khiyaameyaan naftooda waxan ahayn mana dareemayaan * Quluubtay ka bukaan markaasaa Alle u siyaadiyay jirro waxayna mudan cadaab daran beentoodii darteed**) nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu ka digay beenta, wuxuu yiri asoo caddeynaya saameynta ay leedahay:

(وَإِيَّاكُمْ وَالْكَذِبَ فَإِنَّ الْكَذِبَ يَهْدِي إِلَى الْفُجُورِ، وَإِنَّ الْفُجُورَ يَهْدِي إِلَى النَّارِ، وَمَا يَزَالُ الرَّجُلُ يَكْذِبُ وَيَتَحَرَّى الْكَذِبَ حَتَّى يُكْتَبَ عِنْدَ اللَّهِ كَذَّابًا)،

(**iska jira beenta, beenta qofka waxay ku hanuunisaa faajirnimada, faajirnimadana naarta ayay dadka ku hanuunisaa, qofka kama suulo inuu been sheego beentana ku dadaalo ilaa lagaga qoro Alle agtiisa inuu beenlow yahay**)

(وسئل النبي (صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) : أَيَكُونُ الْمُؤْمِنُ جَبَانًا؟ فَقَالَ: (نَعَمْ)، فَقِيلَ لَهُ: أَيَكُونُ الْمُؤْمِنُ بَخِيلًا؟ فَقَالَ: (نَعَمْ)، فَقِيلَ لَهُ: أَيَكُونُ الْمُؤْمِنُ كَذَّابًا؟ فَقَالَ: (لَا)

Waxaa la weyddiiyay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* –: mu'minka ma noqdaa fuley? Wuxuu yiri: (**haa**) waxaa lagu yiri: mu'minka ma noqdaa bakhayl? wuxuu yiri: (**haa**), waxaa lagu yiri: mu'minka beenlow ma noqdaa? Wuxuu yiri: (**maya**)), Abuubakar – *Ilaahay raalli haka noqdee* - wuxuu ku tilmaamay beenta inay tahay khiyaano wuxuu yiri: (runta waa amaano beentana waa khiyaano), sidaas oo kale khiyaanada iyo dabadhilifnimada waxay keenayaan go'idda kalgacalka iyo is nacayb keenaya dagaal iyo loollan fasahaad xagga wada dhaqanka, nabiga - *naxariis*

iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu caddeeyay in khiyaanada amaanada ay qofka ku tahay dulli iyo qoommomo maalinta qiyaame wuxuu yiri:

(إِذَا جَمَعَ اللهُ الْأَوَّلِينَ وَالْآخِرِينَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ، يُرْفَعُ لِكُلِّ غَادِرٍ لِوَاءٌ ، فَيقال: هَذِهِ غَدْرَةُ فُلَانِ بْنِ فُلَانٍ)

(**Markuu Ilaahay kulmiyo dadkii hore iyo dadkii dambe maalinta qiyaame, qof kastoo khiyaanoole ah waxaa loo taagaa calan, waxaa la dhahaa: middan waa khiyaanada hebel ina hebel**), wuxuuna noqonayaa qof Alle la doodayo maalinta qiyaame wuxuu leeyahay rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - :

(ثَلَاثَةٌ أَنَا خَصْمُهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ، وَمَنْ كُنْتُ خَصْمَهُ خَصَمْتُهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ : رَجُلٌ أَعْطَى بِي ثُمَّ غَدَرَ ، وَرَجُلٌ بَاعَ حُرًّا فَأَكَلَ ثَمَنَهُ ، وَرَجُلٌ اسْتَأْجَرَ أَجِيرًا فَاسْتَوْفَى مِنْهُ وَلَمْ يُوفِهِ أَجْرَهُ)

(**Seddex anaa la doodayo maalinta qiyaame, qofka aan la doodana waan ka badiyaa maalinta qiyaame: qofka qof ballan darteyda u siiyay kadib buriyay, qof iibiyay qof xor ah kaddibna lacagtiisa cunay, qof kireysatay shaqaale oo shaqada ka dhammeystay lacagtiisana aan siinin**).

Khiyaanooyinka waxaa ugu khatarsan khiyaanada dalk iyo inaad ku iibiso lacag qiimo jadan iyo hanti adduun oo suulaysa, sida ay sameynayaan khiyaanooleyaasha iyo dadka iyaga taageeraya ama jidkooda haya xagga iibinta dalalkooda ay ku iibinayaan lacag qiimo yar.

Sifooyinka xunxun oo islaamka ka digay waxaa ka mid ah: **xadgudubka marka la doodadayo**, waa shar oo dhan waa dhaleeco kaste aasaaskeeda, waa waxa jidka xaqa ka leexinayo, wuxuu ka dhigaa xaqa baadil baadilkana xaq, Alle wuxuu ku magacaabay fujuurka doodda daran wuxuu yiri:

(وَمِنَ النَّاسِ مَنْ يُعْجِبُكَ قَوْلُهُ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَيُشْهِدُ اللَّـهَ عَلَى مَا فِي قَلْبِهِ وَهُوَ أَلَدُّ الْخِصَامِ)

(**Dadka waxaa ka mid ah mid ku yaab galin hadalkiisu noloshan adduun, maragna gashay Alle waxa qalbigiisa ku sugan, isagoo dood badan**.)

waxaa laga wariyay caash'isha – *Ilaahay raalli haka noqdee* – nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - inuu yiri:

(إِنَّ أَبْغَضَ الرِّجَالِ إِلَى اللَّهِ الأَلَدُّ الخَصِمُ).

(**Ragga waxaa loogu neceb yahay xagga Alle midka ugu doodda badan**)

Munaafiqiinta tilmaanta ugu dhaw lagu sifeyn karo waa labo wejiilenimo, waxaan arkaynaa samankeena inay xadkaas oo dhan gudbeen, waxayba yeeshteen kun

weji, waa kuwa ugu sharta badan khalqiga Alle wuxuu yiri nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(تجـدون شـر النـاس ذا الـوجهين الـذي يـأتي هـؤلاء بوجـه، وهـؤلاء بوجه).

(**Waxaad arkeysaan dadka kan ugu sharta badan waa midka labo wejiilaha, kuwan weji ayuu ula imaanayaa kuwanna weji kale**)

Calaamadaha munaafuqnimada waxaa ka mid ah:

* **Dhulka fasahaadintiisa iyadoo la sheeganayo hagaajin**: Alle – subxaanahu- wuxuu leeyahay:

(وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ لَا تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ قَالُوا إِنَّمَا نَحْنُ مُصْلِحُونَ * أَلَا إِنَّهُمْ هُمُ الْمُفْسِدُونَ وَلَكِنْ لَا يَشْعُرُونَ)

(**Marka lagu dhaho ha fasaadinina dhulka waxay dhahaan annagu waxaan uun nahay hagaajiyeyaal * iyagaa fasaadiyeyaal ah laakin ma dareemayaan**)

Fasahaadinta qaabab badan ayay leedahay, waxaa ka mid ah: dalka in been lagu faafiyo, mu'miniinta dhabta ah lagu dhex faafiyo daciifnimo, fikradaha qalloocan in lagu dhex abuuro iyo mafaahiimta qaldan, iyo in lagu

faafiyo dadka dhexdooda fidno, wuxuu leeyahay Alle – subxaanahu -:

(لَوْ خَرَجُوا فِيكُمْ مَا زَادُوكُمْ إِلَّا خَبَالًا وَلَأَوْضَعُوا خِلَالَكُمْ يَبْغُونَكُمُ الْفِتْنَةَ وَفِيكُمْ سَمَّاعُونَ لَهُمْ وَاللَّهُ عَلِيمٌ بِالظَّالِمِينَ)

(**Hadday baxaan dhexdiinna waxaan xumaan ahayn idiinma kordhiyaan, waxayna u dagdagi lahaayeen fasaadinta dhexdiinna iyagoo idinla dooni fidmo, waxaana idin ku jira kuwo idiin dhagaysan Allana waa ogyahay daalimiinta**)

wuxuu leeyahay Alle:

(وَقَالُوا لَا تَنْفِرُوا فِي الْحَرِّ قُلْ نَارُ جَهَنَّمَ أَشَدُّ حَرًّا لَوْ كَانُوا يَفْقَهُونَ)

(**Waxayna dhaheen ha ku bixina kulaylka, waxaad dhahdaa naarta jahannamo ayaa ka kulayl daran hadday wax kasayaan)**

Wuxuu leeyahay Alle:

(قَدْ يَعْلَمُ اللَّهُ الْمُعَوِّقِينَ مِنْكُمْ وَالْقَائِلِينَ لِإِخْوَانِهِمْ هَلُمَّ إِلَيْنَا وَلَا يَأْتُونَ الْبَأْسَ إِلَّا قَلِيلًا)

(**In badan ayuu Alle ogyahay kuwa reebayaalka ah (ku cabsiinta dagaalka) oo idinka mid ah iyo kuwa ku dhaha walaalahooda (munaafiqiinta ah) noo imaada dagaalkana ma tagaan wax yar mooyee**).

qaababka fasahaadka waxaa ka mid ah: **dadka xaqooda in laga naaqusiyo ama la liido**, wuxuu yiri Alle:

(وَلَا تَبْخَسُوا النَّاسَ أَشْيَاءَهُمْ وَلَا تَعْثَوْا فِي الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ)

(**Hana ka nusqaaminina dadka waxooda hana xumaynina dhulka idinkoo fasaadinaya**), fasahaadka qaababkiisa waxaa ka mid ah: duminta iyo burburinta iyo in la laayo maatada lana argagixiyo dadka amaanka haysta, dadka danahooda in laga reebo, inaan laga soo bixin mas'uuliyad, sidaas oo kale laaluushka iyo afaarqabiilka, iyo hantida dadaka oo si baadil ah loo cuno.

* Astaamaha munaafuqnimada waxaa ka mid ah: **in laga wahsado gudashada cibaadada**, istusna loo sameeyo, gaar ahaan camalka midka ugu fadliga badan waa salaadda, wuxuu yiri Alle:

(إِنَّ الْمُنَافِقِينَ يُخَادِعُونَ اللَّهَ وَهُوَ خَادِعُهُمْ وَإِذَا قَامُوا إِلَى الصَّلَاةِ قَامُوا كُسَالَى يُرَاءُونَ النَّاسَ وَلَا يَذْكُرُونَ اللَّهَ إِلَّا قَلِيلًا)

(**Munaafiqiintu waxay dhagri Alle (isku dayi) isna dhagri buu ku abaalmarin markay u istaagaan salaaddana waxay istaagaan iyagoo wahsan, oo is tusi dadka mana xusaan Alle wax yar mooyee**), wuxuu yiri Alle:

(وَمَا مَنَعَهُمْ أَنْ تُقْبَلَ مِنْهُمْ نَفَقَاتُهُمْ إِلَّا أَنَّهُمْ كَفَرُوا بِاللَّهِ وَبِرَسُولِهِ وَلَا يَأْتُونَ الصَّلَاةَ إِلَّا وَهُمْ كُسَالَى وَلَا يُنْفِقُونَ إِلَّا وَهُمْ كَارِهُونَ)

(**Uma diidin in laga aqbalo waxbixintooda waxan ahayn ku gaaloowgooda ay ku gaaloobeen Alle iyo rasuulkiisa, mana yimaaddaan salaadda iyagoo wahsan mooyee, mana bixiyaan iyagoo neceb mooyee**), wuxuu yiri rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(لَيْسَ صَلَاةٌ أَثْقَلَ عَلَى المُنَافِقِينَ مِنَ الفَجْرِ وَالعِشَاءِ، وَلَوْ يَعْلَمُونَ مَا فِيهِمَا لَأَتَوْهُمَا وَلَوْ حَبْوًا)

(**Salaad kaga culus badan ma jirto munaafiqiinta korkooda salaad subax iyo salaad cisho, hadday ogaan lahaayeen waxa ku sugan way imaan lahaayeen haba hasoo gurguurtaane**).

Jaabir – *Ilaahay raalli haka noqdee* - waxaa laga wariyay inuu yiri nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - ayaa soo baxay wuxuu yiri:

(يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِيَّاكُمْ وَشِرْكَ السَّرَائِرِ) قَالُوا: يَا رَسُولَ اللهِ وَمَا شِرْكُ السَّرَائِرِ؟ قَالَ : (يَقُومُ الرَّجُلُ فَيُزَيِّنُ صَلَاتَهُ جَاهِدًا لِمَا يَرَى مِنْ نَظَرِ النَّاسِ إِلَيْهِ ، فَذَلِكَ شِرْكُ السَّرَائِرِ)

(Dadow iska jira shirkiga qarsoon, waxay dhaheen rasuulkii allow waa maxay shirkiga qarsoon ah? wuxuu yiri: (qofka ayaa isataagaya wuxuu qurxinayaa salaaddiisa isagoo ku dadaalaya waxa uu dadaka uga jeedo dartii oo ah eegidda ay isaga eegayaan, kaas waa shirkiga qarsoon).

Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaato midka lagu kahtimay anbiyada Ilaahay iyo rusushiisa sayidkeena Muxamed ah isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa oo dhan.

Walaalaha islaamka ahow:

Calaamadaha munaafuqnimada waxaa ka mid ah: in cadowga lala safto oo xiriir lala sameysto si diinta iyo

dalka lid ku ah, in basaas loo noqdo warar loo gudbiyo sirta dalkana loo qaado, munaafuqa waa dhabadhilif oo cadowga dalkiisa xiriirinaya, taasoo dhibaysa ehelkiisa iyo deriskiisa iyo qaraabadiisa, wuxuu leeyahay Alle:

(فَتَرَى الَّذِينَ فِي قُلُوبِهِمْ مَرَضٌ يُسَارِعُونَ فِيهِمْ يَقُولُونَ نَخْشَى أَنْ تُصِيبَنَا دَائِرَةٌ فَعَسَى اللَّهُ أَنْ يَأْتِيَ بِالْفَتْحِ أَوْ أَمْرٍ مِنْ عِنْدِهِ فَيُصْبِحُوا عَلَى مَا أَسَرُّوا فِي أَنْفُسِهِمْ نَادِمِينَ)

(**Waxaad arkaysaa kuwa qalbiga ka buka (munaafiqiinta) oo u degdagaya dhexdooda, iyagoo dhahaya waxaannu ka cabsanaynaa inay nagu dhacdo dhibaato (Socota) waxay u dhowdahay in Alle keeno fatxi (Gargaar) xaggiisa ah oo markaas ay ahaadaan kuwo waxay ku qarsadeen naftooda (oo jacaylka gaalada ah) ka shallaaya**), wuxuu leeyahay Alle:

(وَإِنَّ مِنْكُمْ لَمَنْ لَيُبَطِّئَنَّ فَإِنْ أَصَابَتْكُمْ مُصِيبَةٌ قَالَ قَدْ أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيَّ إِذْ لَمْ أَكُنْ مَعَهُمْ شَهِيدًا * وَلَئِنْ أَصَابَكُمْ فَضْلٌ مِنَ اللَّهِ لَيَقُولَنَّ كَأَنْ لَمْ تَكُنْ بَيْنَكُمْ وَبَيْنَهُ مَوَدَّةٌ يَا لَيْتَنِي كُنْتُ مَعَهُمْ فَأَفُوزَ فَوْزًا عَظِيمًا)

(**Waxaa idinka mid ah (Munaafiqiin) cabsin (dib marin) hadday idinku dhacdo musiibo (dhibaato) wuxuu dhahaa waxaa ii nimceeyay Alle haddaanan la joogin ***

Hadduu idin soo gaadho fadli xagga Alle ka yimid wuxuu dhihi sidii isagoo ayna ahayn dhexdiinna jeceyl shallaaytee maxaan ula Joogi waayay, oon liibaano liibaan wayne), munaafuqa wuu ku farxaa marka muslimiinta dalkooda dhib soo gaaro, ama ay fidno ku faafto, ama cudur ku faafo, ama jab soo gaaro, wuxuu yiri Alle:

(إِنْ تَمْسَسْكُمْ حَسَنَةٌ تَسُؤْهُمْ وَإِنْ تُصِبْكُمْ سَيِّئَةٌ يَفْرَحُوا بِهَا وَإِنْ تَصْبِرُوا وَتَتَّقُوا لا يَضُرُّكُمْ كَيْدُهُمْ شَيْئاً إِنَّ اللَّهَ بِمَا يَعْمَلُونَ مُحِيطٌ)

(Hadday idin taabato xasano (wanaag) way xumeysaa hadday idinku dhacdo xumaanna way ku farxaan, haddaad samirtaan ood dhawrsataan idinkama dhibayso dhagartoodu waxba, Ilaahayna waxay sameynayaan wuu koobay)

laakin munaafiqiinta cusub waxay ku darsadeen sifooyinkaas oo ah beenta iyo khiyaanada iyo ballanburinta iyo kicinta dadweynaha iyo khiyaanada diinta sifooyin kale oo cusub oo dhagar ah, waxaa ugu caansan inay ka ganacsadaan diinta, oo ay u adeegsadaan maslaxaddooda kooxeed oo ay rabaan inay diinta ku gabbadaan, iyagoo iska dhigaya wadaaddo daacad ah, iyagaa isku kooba iimaanka muslimiinta

kalena way u diidaan, taasna waxay tahay inay falkooda ka dhigaan inuu yahay mid sharciga waafaqsan, taasna waxaa usii dheer munaafiqiinta cusub khiyaanada dalka iyo liiditaanka ay liidaan oo ayna ku iibiyaan lacag yar.
Ilaahay wuxuu u gooddiyay noocan dadka ka mid ah inay musiibada korkooda ku dhacayso, carada Allana ay ku habsanayso adduun iyo aakhiraba, waxa ay u maleegayaan muslimiinta oo dhib iyo rafaad ah inuu iyaga ku soo noqon doono, wuxuu yiri Alle:

(وَلَا يَحِيقُ الْمَكْرُ السَّيِّئُ إِلَّا بِأَهْلِهِ)

(**Dhagarta xunna kuma dhacdo waxaan ahayn dadkeeda**).

Ilaahay wuxuu ku ciqaabay kuwa munaafuqnimada weyn ku jira jahawareer iyo xasilloonidarro iyo cabsi iyo argagax mar kaste, wuxuu yiri:

(مُذَبْذَبِينَ بَيْنَ ذَلِكَ لَا إِلَى هَؤُلَاءِ وَلَا إِلَى هَؤُلَاءِ وَمَنْ يُضْلِلِ اللَّهُ فَلَنْ تَجِدَ لَهُ سَبِيلًا)

(**Waxayna ku noqnoqon (wareeri) arrintaas dhexdeeda kuwaasina lama jiraan kuwaanna lama jiraan, cidduu dhumiyay Alle uma heshid waddo (cid hanuunin**). wuxuu yiri Alle:

(يَحْسَبُونَ كُلَّ صَيْحَةٍ عَلَيْهِمْ هُمُ الْعَدُوُّ فَاحْذَرْهُمْ قَاتَلَهُمُ اللَّهُ أَنَّى يُؤْفَكُونَ)

(**Qaylo kasteba waxay u maleeyaan korkooda inay tahay, iyagaana cadowga ah, Alle ha lacnado ee xaggee loo duufsan**).

Ilaahay wuxuu ka leexiyay quluubtooda inay wax ka fahmaan Alle iyo rasuulkiisa, hanuunka ma gaaro quluubtooda, khayrkana ma galo, wuxuu yiri Alle:

(ذلِكَ بِأَنَّهُمْ آمَنُوا ثُمَّ كَفَرُوا فَطُبِعَ عَلى قُلُوبِهِمْ فَهُمْ لا يَفْقَهُونَ)

(**Saas waxaa ugu wacan inay (afka ka) rumeeyeen haddana (hoosta) ka gaaloobeen, quluubtoodana waa la daboolay wax xaq ahna ma kasayaan**) Ciqaabtooda Aakhiro Ilaahay wuu ka hadalay wuxuu yiri:

(وَمِمَّنْ حَوْلَكُمْ مِنَ الْأَعْرَابِ مُنَافِقُونَ وَمِنْ أَهْلِ الْمَدِينَةِ مَرَدُوا عَلَى النِّفَاقِ لَا تَعْلَمُهُمْ نَحْنُ نَعْلَمُهُمْ سَنُعَذِّبُهُمْ مَرَّتَيْنِ ثُمَّ يُرَدُّونَ إِلَى عَذَابٍ عَظِيمٍ)

(**Gaararkiinna waxaa ka mida reebaadiye munaafiqiin ah, reer Madiinana (waa kamid) waxay ku madax**

taageen munaafaqnimo, ma ogidiin annagaase og, waxaannu cadaabi labo jeer, markaasaa loo celin cadaab weyn)

Cadaabka koowaad waa adduunka, kan labaadna waa qabriga, cadaabka weynna waa aakhiro, Ilaahay wuxuu kulminayaa munaafiqiinta iyo kuwa la midka ah ee gaalada, wuxuu yiri Alle:

(إِنَّ اللَّهَ جَامِعُ الْمُنَافِقِينَ وَالْكَافِرِينَ فِي جَهَنَّمَ جَمِيعًا)

(**Ilaahayna wuxuu ku kulmin munaafiqiinta iyo gaalada Jahannamo dhammaan**), wuxuu leeyahay Alle – subxanahu -:

(إِنَّ الْمُنَافِقِينَ فِي الدَّرْكِ الْأَسْفَلِ مِنَ النَّارِ وَلَنْ تَجِدَ لَهُمْ نَصِيرًا * إِلَّا الَّذِينَ تَابُوا وَأَصْلَحُوا وَاعْتَصَمُوا بِاللَّهِ وَأَخْلَصُوا دِينَهُمْ لِلَّهِ فَأُولَئِكَ مَعَ الْمُؤْمِنِينَ وَسَوْفَ يُؤْتِ اللَّهُ الْمُؤْمِنِينَ أَجْرًا عَظِيمًا)

(**munaafiqiintu waxay ku sugnaanayaan dabaqa hoose ee Naarta umana heleysid gargaare * kuwa toobadkeenay ee wanaajiyay camalka, oo isku dhawray Alle, oo u kali yeelay diintooda (Cibaadadooda) Ilaahay kuwaasi waxay la jirayaan**

mu'miniinta, wuuna siin doonaa Alle Mu'miniinta ajir wayn)

si loo badbaadiyo dowladaha loona ilaaliyo jiritaankooda iyo ishaysashadooda iyo nabadgalyadooda waxaa lagama maarmaan ah inay soo jeedaan dadka daacadka u ah, ha ahaadaan shakhsiyaal ama hay'ado, waxaa lagama maarmaan ah dadka sharafta leh inay isku darsadaan dadaalkooda si ay u dabargoyn lahaayeen khiyaanoleyaasha iyo dabadhilifyada iyo kuwa cadwoga jaajuus u ah ee dambiileyaasha ah, oo ay bannaanka usoo dhigi lahaayeen si ay ugu noqdaan cibro qof kaste oo naftiisa u qurxinayso inuu jidka khiyaanada maro, si diinteena aan u ilaalino iyo dalkeena iyo sharafteena iyo nafteena, iyo mustaqbalka dalkeena iyo ubadkeena, waxaas oo dhaan waxaa ka horreeya raalliga rabbigeena iyo badbaadinta dalkeena iyo ka ilaalinta dowladaheena inay soo gaaraan wixii ku dhacay dowladaha ka gaabiyay ama fududeystay ka hortagga khiyaanooleyaasha iyo kuwa cadowga u shaqeeya, waxayna u qaateen arrin sahlan, arrinkaas kuma sahlana taariikhda dowladaha.

Ilaahayow ka dahiri quluubteena munaafuqnimada, iyo indhaheenana khiyaanada iyo carrabkeenana beenta dalalka muslimiintana ilaali